

DHAMBAAAL

KU: Guddoomiyayaasha Waxbarashada, Daneeyayaasha, Kormeerayaasha Vermont, Maamulayaasha iyo Guddiyada Dugsiyada

KA: Xoghaye Bouchey

MAWDUUCA: Natiijooyinka Hannaanka Daneeyayaasha Siyaasadda iyo Siyaasadda Tusaalaha ee la Soosaaray sida uu Dhigayo Xeerka 29 ee 2023, Qaybta 4

TAARIKHDA: November 7, 2023

Gundhig

Sida ay dhigayso Qaybta 4 ee Xeerka 29 ee 2023, tallaabo la xiriirta badbaadada dugsiya, Wakaaladda Waxbarashadu (Agency of Education, AOE), iyadoo la tashanaysa kooxaha daneeyayaasha, waxa looga baahday inay dejiso siyaasad tusaale ah iyo habraac la xiriira isticmaalka kooxaha qiimaynta habdhaqanka khatarta ah. In ka badan lix toddobaad oo Sibtambar iyo Oktoobar ah, Hay'addu waxay fududaysay shan kulan oo kala gooni ah oo ay la yeelatay daneeyayaal kala duwan si ay uga wada hadlaan isticmaalka kooxaha qiimaynta habdhaqanka khatarta ah (BTATs) ee dugsiyada gobolka oo dhan.

Ujeedada

Intii shanta kulan socdeen, Hay'addu waxay warkooda dhagaysatay dad badan oo hadlay si ay uga caawiso hagidda wada-sheekaysiga kooxda. Dadka hadalka jeediyey waxa ka mid ahaa khubaro ka tirsan badbaadada dugsiya iyo BTAT, iyo daneeyayaal khibrad u leh waxbaashada K-12, xuquuqda rayidka, iyo abuurista iyo ka hirgalinta siyaasado tusaale ah dugsiyada.

Ujeedada kooxdu waxay ahayd dhiirgalinta wada-hadalka ku saabsan halisaha iyo caqabadaha la xiriira BTATs. Wada-hadaladani waxay ka caawiyeen Wakaaladda inay dejiso siyaasad tusaale oo xooggan si ay ugu maamusho nidaamyada dugsiyada (sida, ururka horjoogenimada/degmo dugsiyeedka [SUD/SDs] iyo dugsiyada madaxabannan) isticmaalka BTATs, halka inta soo hadhayna diiradda saarayso baaxadda sharciga iyo ku-camalfalka wanaagsan. Kooxdu waxay wadaagtay yool guud iyo ballanqaad lagu xaqiijinayo in ardayda oo dhan, gaar ahaan ardayda taariikh ahaan la yaraystay, ay dareemaan badbaado, soo dhawayn, iyo qaddarin inta ay waxbarashada ku jiraan.

Kooxda Daneeyayaasha

- Wakaaladda Waxbarashada – Ted Fisher, Lindsey Hedges, Jill Briggs Campbell, Emily Simmons
- Agaasimaha Kahortagga Qalalaasaha – Dee Barbic
- Xarunta Badbaadada Dugsiya Vermont – Sunni Erikson, Rob Evans
- Guddida Gobolka ee Waxbarashada – Richard Werner



- Guddida Xuquuqda Aadanaha – Amanda Garces
- Xafiiska Sinnaanta Qoomiga ah – Jay Greene, Xusana Davis
- Xafiiska Difaacaha Guud (Da'yarta) – Marshall Pahl
- Ururka Maamulayaasha Vermont – Jay Nichols
- Ururka Kormeerayaasha Vermont – Jeff Francis
- Ururka Guddiyada Dugsiyada Vermont – Sue Ceglowski, Cara Zimmerman
- Ururka Barayayaasha Heer Qaran ee Vermont – Donald Tinney
- Sanduuqa Caymiska Guddiyada Dugsiyada Vermont – Jonathan Steiner, David Pickel
- Kaalmada Sharciga Vermont – Barb Prine
- Ururka Dugsiyada Madaxabannaan ee Vermont – Drew Gradinger
- Rutland NAACP – Mia Schultz
- Gedakina – Judy Dow
- Barayaasha Vermont – Brooke Olsen Farrel, David Manning, Henri Sparks, Theresa Giallorenzo, Becca McCray, Kate Paxton

Guudmarka Siyaasadda Tusaalaha

Siyaasaddan waxa loogu talagalay in loogu abuurto deegaan waxbarasho oo badbaado iyo ammaan ah ardayda iyo shaqaalaha. Waxay dejinaysaa barnaamij si ay uqiimayso oo maarayso habdhaqanada laga yaabo inay khatar ku noqdaan dugsiyada, xarunta, ama goobta shaqada. Yoolku waa xaqiijinta badbaadada, qaddarinta, iyo taageerada niyadeed ee cid kasta.

Si looga dheeraado eex, qiimayntu waxay ku salaysan tahay habdhaqanka qofka, kuma salaysna sifooyinka shakhsiyeed. Siyaasaddu waxay qiraysaa ahmiyadda ay leedahay in lala dagaalamo eexda, gaar ahaan marka ay jirto xog sheegayso in ardayda taariikh ahaan la yaraystay ay si caddaalad darro ah u waajahaan natiijooyin taban.

Siyaasaddu waxay caddaynaysaa in qiimaynta khatartu ayna ka dhignayn in ardayda loo diro nidaamka caddaaladda faldambiyeedka laakiin ay tahay in la siiyo khayraad si loo hubiyo in ardaygu helayo taageerada uu u baahan yahay. Horseedi mayso hakin ama eri ilaa laga fursan waayo si loo ilaaliyo ammaanka bulshada dugsiyada. Ka bixinta jawaabo kulul oo dhakhso ah ama soo daaha waxay noqon karaan halis marka ardayda laga saaro dugsiyada, sidaa darteed taageeradu waa lama-huraan. Haddii lagu taliyo in arday dugsiyada laga saaro, waa in sharciga loo raaca.

Siyaasaddu waxay sheegaysaa in la sameeyo kooxda qiimaynta khatarta. Xubnaha kooxda waxa ka mid ah xubno khibrad u leh meelo kala duwan sida la-talinta, sharci fulinta, iyo maamulka dugsiyada. Kooxdu waxay qiimaysaa oo maaraysaa habdhaqanada ay suurtoagal tahay inay khatar yihiin iyadoo isticmaalaysa xaqiiqooyin sal leh. Diiradda waxa al saaraa abuurista deegaan badbaado iyo taageero ay cid kasta ka hesho. Kooxdu awood uma laha inay arday dugsiyada ka saaraan. Go'aanka in arday dugsiyada laga saaro waxa gaara kormeeraha ama maamulaha isagoo raacaya siyaasadaha dugsiyada. Xaaladaha ku lugta leh waxbarashada gaarka ah ama ardayda Qaybta 504, kooxdu la shaqaysaa qorshaha waxbarashada la khaas yeelay ee ardayga ama kooxda 504.

Siyaasaddu waxay u oggolaanaysaa xubnaha kooxdu inay helaan diiwaanada ardayga markii loo baahdo sida ay dhigayso shuruucda asturnaantu. Diiwaanada la abuurto muddada qiimaynta

khatarta laguma daro diiwaanada waxbarashada rasmiga ah ee ardayga. Kooxda waxa lagu booriyaa inay qoraan marka khatar aan la helin.

Koreemuhu wuxuu samayn habraacyo ku aaddan ururinta iyo tabinta xogta la xiriirta barnaamijka qiimaynta khatarta. Xogta waxa ku jiri doona macluumaad ku saabsan kooxda, tirada qiimaynaha iyo dib-u-eegista, faahfaahinta ardayga, iyo natiijooyinka qiimaynta. Habraacyada ururinta iyo tabinta xogta ee loogu talagalay joogtaynta daahfurnaanta iyo hubinta dhexdhexaadnimada hannaanka.

Halkudhegyada Siyaasadda Hannaanka Daneeyaha

Halkudhegyada soo socda waxa sheegay daneeyayasha waxaana wax looga qabanayaa siyaasadda tusaalaha:

Tabobar: Tabobar joogto ah oo macne leh ayaa si gaar ah loo sheegay, kaasi oo xaqiijinaya in barayaashu helaan xirfadaha ay u baahan yihiin, oo aan kaliya ahayn sax saaridda sanduuq. Waxa sidoo kale jiray wada-hadal laga yeeshay sida loo xaqiijinayo in bulshada dugsigu ay fahamto hannaanka, oo aysan kaliya ku koobnaan kuwa tooska ugu lugta leh kooxda BTAT.

Midaynta hannaanka BTAT: Hannaanka BTAT waa inuu kaabay, laakiin uusan koobi garanaynayn, ama baddalayn, taageerooyinka ardayga ee hadda jira, waana inuu noqdo mid dabacsan oo daboolaya baahiyaha gaarka ah ee ardayga.

Diiwaan-haynta BTAT: Waxa jira walaacyo sheegaya in hannaanada BTAT uusan keenin abuurista iyo isticmaalka diiwaanada ardayga oo sifo qaldan loo isticmaalo ama loo farsirto xaaladaha/jawiyada kale, sida nidaamka caddaaladda da'yarta, gaar ahaan marka hannaanku uusan ahayn mid dhaafsiisan wejiga qiimaynta.

Qarsoodiga: Daneeyayaashu waxay rabeen in la hubiyo in diiwaanada iyo macluumaadka loo isticmaalay si sax ah iyo inuu jiray qaab warbixinaha aan khatarta la helin meesha looga saarayo.

Sharci fulinta: Daneeyayaashu waxay walaac ka muujiyeen in Saraakiisha Khayraadka Dugsigu (School Resource Officers, SROs) ay raad caddaalad darro ah ku lahaayeen ardayda ka soo jeeda kooxaha la yaraystay taariikh ahaan. Muhmal-ka-saaridda marka iyo haddii Saraakiisha Khayraadku Dugsigu ay tahay inay ku lug yeeshaan ayaa xoogga la saaray, sidoo kale waxa xoogga la saaray xeerarka gaarka ah ee xarunta ee goorta MOU iyo bilaysku soo farogaliyeen.

Edbinta eryidda ku salaysan: Daneeyayaashu waxay walaac ka muujiyeen in BTAT ay horseedi karaysay edbin eryid ku salaysan waxayna rabeen xaqiijinta in ardayda qaybta ka ahaa BTAT socda ay sii wadan lahaayeen helitaanka waxbarashada ay xaqa u leeyihiin.

Tilmaamaha Mustaqbalka, Taageerada Tabobarka iyo Farsamada

Nidaamyada dugsiyada loogama baahna inay samaystaan BTAT-kooda ilaa laga gaarayo Julaay 2025. Wakhtiga kumeel gaarka ah, Wakaaladdu, iyadoo la tashanaysa Waaxda Badbaadada Dadwaynaha, waxay dejin doontaa oo cusboonaysiin doontaa tilmaamo la xiriira ku-camalfalada wanaagsan iyo tabobarka sare lagu sheegay. Sida uu dhigayo Xeer 29, the

AOE ayaa hoggaaminta hawlahaan iyadoo xisaabta ku darsanaysa walaacyada la sheegay muddadii hannaanka kaqaybgalka daneeyaha.

Sidoo kale, Xeer 29 wuxuu sheegayaa in BTAT-ka wakhtigan ay waajib tahay inuu cusboonaysiiyo habraacooga iyadoo raacaya siyaasadda tusaalaha ee ugu dambaysay ee ay soosaartay Wakaaladdu bishii Diisambar. Arrintani waxay u oggolaan doontaa isticmaalayaasha BTATs inay kooxohoogu hirgaliyaan ku-camalfallada wanaagsan sanad dugsiyeedka 2024-2025.

Qaybta 4 ee Xeer 29 wuxuu si gaar ah u sheegayaa tabobar sanadle ah si loo hubiyo in xubnaha BTAT lagu tabobaray ku-camalfallada wanaagsan iyo tirtiridda eexda. Tabobarradan waxa ka mid ah:

- Xeerar khuseeya siyaasadda edbinta ku salaysan eryidda (CVR 22-000-009)
- Ujeedada, isticmaalka, iyo hirgalinta saxda ah ee hannaanka kulanka go'aaminta sababta falka kalliftay
- Qaybta 504 ee Xeerka Dhaqancelinta ee 1973
- Xeerka Ameerikaanka Naafada ah ee 1990
- Cawaaqibta taban ee ka eryidda dugsiga
- Raadka jugtu ku leedahay koboca maskaxda
- Tabobarka eexda kooxeedka ee shiishka lagu saarayo fulinta waajibaadyada BTAT ee nidaamkooda dugsiga ee gaarka u ah

Bilawgii sanad dugsiyeedkan (2023-2024) Wakaaladda ayaa bilawday ururinta xogta laga uruurnayo nidaamyada dugsiyada ee hadda isticmaala BTAT. Ururinta xogta waxay noqon mid gobolka oo dhan wada gaarta iyadoo nidaamyo dugsi oo dheeraad ah ay bilaabaan inay ku tabobaraan kooxahooga. Xogtu waxay u oggolaan doontaa Wakaaladda inay qiimayso isbaddalada oo ay siiso macluumaad dheeraad ah tilmaanta iyo tabobarka markay daruuri noqoto.

Wakaaladdu waxay ammaanaysaa gacanta ay gaysteen shurakadayada qiimaha badan kuwaasi oo wakhtigooda iyo khibraddooda ku bixiyey xoojinta iyo horumarinta hannaankan muhiimka ah. Wakaaladda waxa ka go'an joogtaynta kaqaybgalinta socota iyadoo aanu ku hawlannahay in gobolka oo dhan lagu ballaariyo hannaanka BTAT.